

XEER –SHARCI L. 3 ee 22 Luulyo 1960

**DHISMAHA WASAARADDA ARRIMAHA DIBEDDA, WASAARADDA
DIFAACA IYO WASAARADDA WARFAAFINTA**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA

KADIB markii la arkay awoodaha lagu siiyey amarrada labaad ee ku meel gaarka iyo kuwa dastuuriga ah.

KADIB markii la arkay faqradda 1 ee qod. 81 ee Dastuurka;

KADIB markii la arkay faqradda 1 ee qod. 63 ee Dastuurka,

IYADOO laga baaran degey baahida degdegga ah ee loo qabo in la dhiso;

Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Wasaaradda Difaaca iyo tan Warfaafinta;

IYADOO la tixgeliyey soo jeedinta iyo raali ka ahaanshaha Golaha Wasiiradaha.

WUXUU XEERAYNAYAA:

Qod. 1

Waxaa la dhisay Wasaaradaha soo socda:

1. — Wasaaradda Arrimaha Dibedda;
2. — Wasaaradda Difaaca;
3. — Wasaaradda Warfaafinta.

Qod. 2

Dekreeto- sharcigaani wuxuu hirgali doona maalinta ku xigta maalintii lagu daabacay Faafinta Rasmiga ah waxaana 5 beri gudahooda laga bilaabo taarikhdaasi la horgeyn doonana Golaha Qaranka si loogu beddelo sharci.

Muqdisho 22 Luulyo 1960

Madaxweynaha Jamhuuriyada
Aden Abdulla Osman

Rai'sul Wasaaraha
Abdirashid Cali Shermarke

Diwaan no.1 – bogga lamb 4
Muqdisho, 22 Luulyo 1960.